

Macluumaadka Kormeeraha

Matxafka Fanka Seattle, Jardiinada Farshaxanka Olympic iyo Matxafka Fanka Seattle

Waad ku mahadsantahay noqoshada kormeere safarka aqoon-korodhsi!

Mudnaantaada koowaad waa kooxda ardayda ee aad la jirtid - ardaydaan waxay u baahanyihiin dareenkaaga buuxo. Adiga ayaa masuul ka ah edbintooda iyo hubinta inay haystaan waaya-aragnimo barasho oo raaxo iyoka qeybgal leh. **Waxaa loo baahanyahay inaad la joogtid kooxdaada marwalba.**

Ardaydaadu waa:	1. _____	6. _____
	2. _____	7. _____
	3. _____	8. _____
	4. _____	9. _____
	5. _____	10. _____

Fadlan la eeg ardaydaada ka hor inta aadan imaanin matxafka ama jardiinada:

Xeerka Lambarka 1: Is-ixтираama midba midka kale

- Saraogso/fariiso si markaas qof walba u arko.
- Hadal hal mar waqtigiiba oo dhawaaq si loo maqlo laakiin ma ahan si aad u dhawaaq dheer oo martida kale ee matxafka ama jardiinada ay carqaladeyso.

Xeerka Lambarka 2: Ixtiraam fanka

- Istaag qiyaastii meel hal cag u jirta fanka si markaas aadan si shil ah u taaban. Saliidaha dabiiciga ah ee faraha marsan waxay waxyeelayn karaan fanka.



- SAM waxay oggolaataa sawir qaadista bilaa iftiinka ah ee aagaga inta u badan, markii laga reebo bandhigyada gaarka ah iyo markii lagu tilmaamay astaanta sawir qaadis lama oggola.
- Sawir qaadista iyo fiidiyow qaadista ganacsiga waa ka mamnuuc Jardiinada Farshaxanka Olympic. Sawir qaadista shaqsiga waa la oggolyahay laakiin looma isticmaali karo ganacsi ahaan.
- Sawirista warbaahin qallalan (qalin-qori, qalin-qoriga midabeysan ama tabaashirta) waa loo oggolyahay bandhigyada matxafka. Fadlan la imow agabkaaga gaarka ah.
- Boorsooyinka, boorsooyinka naagaha, boorsooyinka qadada iyo boorsooyinka dhabarka ee ka weyn 11x15 inji waa in meelo loo dhigaa (loogu talagalay macalimiinta iyo kormeerayaasha kaliya) ama la soo dhigaa sanduuqa keydka dugsiga (loogu talagalay ardayda).
- Lama oggola cunto ku cunis/xanjo ku calaalin bandhigyada matxafka.

Xeerka Lambarka 3: Ixtiraam dadka kale, dhismaha iyo jardiinada

- Soco si markaas aadan wax ama qofna ugu dhicin.
- Fadlan wadada hay iyo wadooyinka lugta ee Jardiinada Farshaxanka Olympic.
- Haddii uu roob da'oo oo aad ku cuntid qadadaada bacaysan Jardiinada Farshaxanka Olympic Pavilion, fadlan sii miisaska iyo kuraasta martida kooxda aan dugsiga aheyn oo ka illaali ciyaarta xun.